Siyaasadda JBB-R- HABRAACYADA BAARITAANKA ASHTAKOOYINKA EE DHIBAATAYNTA

I. HABRAACYADA WARBIXINTA

Arday kasta ee aaminsan in asaga ama ayada ay yihiin dhibane dhibaatayn galmood ama dhibaatayn ku saleysan qollo ama midab, waddanka asalka ahaan uu ka soo jeedo, dookha galmo, naafonimada ama diinta ee ardayga, macalinka, maamulaha ama hawlwadeenada kale ee dugsiga ee Degmada Dugsiga, ama qof kastoo kale ee ka qaybqaadanaya, daawanaya, ama haddii kale ka qaybqaadanaya waxqabadyo, oo ay ku jiraan dhacdooyinka ciyaareed iyo waxqabadyada kale ee manhajka waxbarashada ee dheeraadka ah, ee hoos imaanaya maamulka Degmada Dugsiga , waxaa si degdeg ah loogu dhiirigelinayaa in ay u soo sheegaan ficilada eedaynta mas’uulka Degmada Dugsiga ku habboon ee lagu magacaabay siyaasaddan.

Macalin kasta, maamulaha, ama mas'uulka kale ee dugsiga ee haya ama hela ogeysiiska ah in arday uu yahay ama uu ahaa dhibanaha dhibaataynta noocaas ah oo ay u geysteen arday, macalin, maamule ama hawlwadeenada kale ee dugsiga ee Degmada Dugsiga, ama shaqsi kastoo kale ee ka qaybqaadanaya , daawanaya, ama haddii kale ku lug leh waxqabadyada, oo ay ka mid yihiin dhacdooyin ciyaareed iyo waxqabadyada kale ee manhajka waxbarashada ee dheeraadka ah, eena hoos imaanaya maamulka Degmada Dugsiga , waxaa si degdeg ah loogu dhiirigelinayaa in ay u ugu soo sheegaan ficilada eedaynta mas’uulka Degmada Dugsiga ku habboon ee lagu magacaabay siyaasaddan

Shaqsi kastoo kale ee og ama aaminsan in arday uu yahay ama laga yaabo in uu ahaa dhibane dhibaatayn galmo ama dhibaatayn ku saleysan jinsi sida lagu soo sheegay kor, waxaa si degdeg ah loogu dhiirigelinayaa in uu u soo sheego ficilada eedaynta mas’uulka Degmada Dugsiga ee ku habboon ee lagu magacaabay siyaasaddan.

Degmada Dugsiga waxay ku dhiirigelinaysaa dhinaca ka soo warbixinaya ama ashtakoodaha in ay isticmaalaan foomka warbixinta ee laga heli karo maamulaha dhisme kasta ama laga heli karo Sarkaalka Title IX , balse warbixinada hadalka ah waa in sidoo kale ashtako ahaan loo tixgeliyaa. Istcimaalka foomka warbixinta rasmiga ah waajib ma aha. Wax ku jira siyaasaddan kama reebaya qof kasta in uu uga soo warbixiyo dhibaatayn si toos ah Sarkaalka Title IX ama Kormeeraha guud.

A. Dhisme Dugsi Kasta. Maamulaha dhismaha waa shaqsiga ka mas'uulka ah qabashada warxbixinada qoran ama hadalka ah ee dhibaataynta heerka dhisme. Hawlwadeen kasta ee Degmada Dusgiga ee gaangaar ah ee qabta warbixinta dhabaatayn ka dhacday dugsiga waa in uu si degdeg ah ugu wargeliyo maamulaha dhismaha.

Isla marka uu helo warbixinta, maamulaha waa in uu ogeysiiyaa Sarkaalka Title IX kaasi oo isku dubaridaya baaritaanka ashtakada. Haddii ashtakada uu ku lug leeyahay maamulaha, warbixinta waa in laga sameeyaa ama si toos ah loogu soo gudbiyaa Sarkaalka Title IX ama Kormeeraha guud.

B. Degmada oo Dhan. Guddiga Dugsiga waxay u magacaabeen Sarkaalka Title IX in uu ka qabto waxbixinta ama ashtakooyinka dhibaataynta ardayda maamuleyaasha dhismaha sida lagu muujiyay kor iyo shaqsiyaadka kale. Hawlwadeen kasta ee Degmada Dusgiga ee gaangaar ah ee ku qabta warbixin dhibaatayn mid ka mid ah xafiisyada dhexe waa in uu si degdeg ah ugu wargeliyo Sarkaalka Title IX. Haddii wax ashtako ah uu ku lug leeyahay Sarkaalka Title IX, ashtakada waa in si toos ah loogu soo gudbiyo Kormeeraha guud.

C. Degmada Dugsiga waa in ay si muuqata ugu soo dhejiso siyaasaddan oo kooban ee ka soo horjeedda dhibaataynta iyo xadgudubka iyo magaca Sarkaalka Title IX dugsi kasta gudahiisa iyo xafiis dhexe kasta gudahiisa ee Degmada Dugsiga suurtagelisay, goob ay u fududahay in ay gaaraan macalimiinta, maamuleyaasha iyo shaqaalaha kale. Waxaa siidheer, in siyaasaddan la soo dhigi doono bogga internetka ay ku leedahay Degmada Dugsiga. Nuqulo ayaa sidoo kale laga heli karaa xafiiska maamulaha ee dugsi kasta iyo Waaxda Khayraadka Aadanaha.

D. Degmada Dugsiga waxay xushmeynaysaa kali ahaanshaha ashtakoodaha, shaqsiyaadka laga soo gudbiyay ashtakada, iyo markhaatiyaasha sida ugu suurtagalsan, ee raacsan waajibaadka baaritaanka sharciga ah ee Degmada Dugsiga, si loo qaado talaabo ku habboon, iyo si loo waafijiyo waajibaadyada soo saaridda ama soo sheegidda.

II. BAARITAAN IYO TALO

Isla marka la helo warbixinta ama ashtakada eedaynta dhibaatayn la mamnuucay, Sarkaalka Title IX waa in si dhakhso ah u qaadaa ama uu u oggolaadaa baaritaan.

Baaritaanka wuxuu ka koobnaan karaa xog-wareysiyo shaqsi ahaaneed oo lala yeelanaayo soo ashtakoodaha, shaqsiga ashatakada laga soo gudbiyay, iyo kuwa kale ee wax ka og dhacdada eedaynta ama duruufaha keeni kara ashtakada. Baaritaanka waxaa sidoo kale laga yaabaa in uu ka koobnaado qiimeynta xog kastoo kale ama dukumentiyo kasta ee laga yaabo in ay la xiriiraan eedaymo gaar ah.

Go’aaminta haddii habdhaqanka eedaynta uu ka kooban yahay xadgudubka siyaasaddan, Degmada Dugsiga waa in ay tixgelisaa waxyaabahan soosocda:

· dabiicigga iyo macanaha guud ee dhacdooyinka

· soo noqnoqoshada, muddada, soo noqnoqodka, darnaanta, iyo xadka dhibaataynta lagu soo eedeeyay

· xiriirka ka dhaxeeya dhinacyada ku lugta leh

· lab/dheddig ahaan, qollada, midabka, dookha galmo, waddanka asal ahaan uu ka soo jeedo, naafonimada, Diinta iyo/ama da’da dhibanaha

Haddii talaabo gaar ah ama dhaco ay ka kooban yihiin sharci-jabinta siyaasaddan waxay u baahan yihiin go’aamin ku saleysan dhammaan xaqiiqda iyo daruufaha ku hareersan.

Sarkaalka Title IX ama qofka ayada ama asaga ay u magacaabeen waa in ay u sameeyaan warbixin qoran Kormeeraha guud isla marka la dhammeeyo baaritaanka. Haddii ashtakada uu ku lug leeyahay Kormeeraha guud, warbixinta waa si toos ah loogu gudbiyaa Guddiga Dugsiga. Warbixinta waa in ay ka mid noqdaan go’aaminta haddii eedaymaha loo keenay sida xaqiiqda ah ahaan iyo haddii ay u muuqdaan in ay jabinayaan sharciyada siyaasaddan.

III. TALAABADA DEGMADA DUGSIGA

A. Sarkaalka Title IX ama qofka asaga ama ayada ay u magacaabeen waa in ay ku wargeliyaan ashtakoodaha iyo dambiilaha eedaysan waxa ka dhashay baaritaanka iyo talaabooyin kasta ee Degmada Dugsiga ay u qaadeyso sababta gabogabodeeda. Degmada Dugsiga waxay sheegaysaa xogtan ayadoo la

eegayo sharciyada gobolka iyo kuwa dowladda dhexe ee khuseeya kali ahaanshaha xog ama diiwaano, eena raacsan xuquuqda kali ahaanshaha ee dambiilaha eedaysan.

B. Isla marka la helo warbixin ah in xadgudub uu dhacay, Degmada Dugsiga waxay qaadeysaa talaabo aan rasmi ahayn ama mid rasmi ah oo ku habboon, ama dhaksho ah si ay waxa uga qabato, iyo meesha ku habboon, ay xaliso xadgudubka, oo ay ka mid tahay siinta gargaar ku habboon dhibanaha. Haddii dambiilaha eedaysan uu yahay arday kale, talaabooyinka ku habboon waxaa ka mid noqon kara balse aanan ku xaddidnayn la talin, tababar wacyigelineed, shirarka macalin-waalidka, digniin, dugsi ka joojin, dugsi ka cayrin, dugsi kale u wareejin, iyo xallin. Haddii dambiilaha eedaysan uu yahay shaqaalaha Dugsiga Degmada, talaabooyinka ku habboon waxaa ka mid noqon kara, balse aanan ku xaddidnayn, digniin, dugsi ka joojin ama shaqo ka joojin degdeg ah. Talaabo kasta ee Dugsiga Degmada ee la qaaday ayadoo la higsanayo siyaasaddan waxay raacsan tahay shuruudaha heshiiska dhexmara shaqaalaha abaabulan iyo loo-shaqeeyaha ee la adeegsan karo, sharciga u degan gobolka iyo siyaasadaha Degmada Dugsiga. Degamada Dugsiga waxay qaadeysaa talaabada ay u aragto in ay daruuri tahay ayna ku habboon tahay joojinta dhibaataynta iyo ka hortaga soo noqnoqoshadeeda.

IV. AAN AARSASHO LAHAYN

Gudbinta ashtakada daacadnimada ah ama warbixinta dhibaatayn ma saameynayso shaqada mustaqbalka ashtakoodaha ama warbixiyeyaasha, jawiga shaqada, hawlaha shaqada, jawiga waxbarashada ama fasalada.

Degmada Dugsiga waxay anshax marinaysaa ama ay ka qaadeysaa talaabo ku habboon ardayga, macalinka, maamulaha ama hawlwadeenka kale ee dugsiga ee ka aarsado shaqsi kasta ee soo sheegga dhacdo eedayn dhibaatayn galmo ama rabshad, ama qof kasta ee ka markhaati kaca, caawiya ama ka qaybqaata nidaamka dacwadda, baaritaanka ama dhageysiga la xiriira dhabaataynta ama rabshada noocaas ah. Ka aar-gudushada waxaa ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, nooc kasta oo ah cabsi-galin, aar-gudasho ama dhibaatayn.

V. AAN DHIBAATAYN LAHAYN

Degamada Dugsiga waxay aqoonsan tahay in shukaansasho ama habdhaqanka kasta ee dabiiciga galmada la xiriira aysan ka koobnayn dhibaatayn galmo. Haddii talaabada gaarka ah ama dhacdada ay tahay mid shaqsiyadeed, xiriirka bulshada ee aan lahayn saameyn takoorid wuxuu u baahan yahay go'aamin ku saleysan dhammaan xaqiiqaha iyo daruufaha ku hareersan. Sidoo kale, ma aha dhammaan habdhaqanka la xiriirta qolloda, midabka, waddanka asal ahaan ka soo jeedo, dookha galmo, naafonimada ama diinta qofka ay gaarayso heerka dhibaataynta la mamnuucay. Mar labaad, go'aaminta haddii dhibaataynta dhacdey ay ku xirnaanayso dhammaan daruufaha ku hareersan.

VI. XUQUUQDA HABRAACYADA ASHTAKADA BADDALKA AH

Habraacyadan ma diidayaan xuquuqda shaqsi kasta ee sii-wadaya hababka kale ee kaalmaysasho.

VII. DHIBAATAYNTA GALMO EE AH SIDA XADGUDUBKA GALMO

Ayadoo la hoos imaanayo daruufaha qaar, dhabaataynta galmo waxay noqon kartaa xadgudub galmo iyadoo la eegayo sharciyada u degsan gobolka. Xaaladaha noocaas ah, Degmada Dugsiga waa in ay u hoggaansantaa shuruudaha ka soo warbixinta ee sharciga gobolka iyo habraacyada hoos imaanaya siyaasadda Degmada Dugsiga ee ku saabsan ku xadgudubka ilmaha.

VIII. HANAANKA RAFCAANKA

Haddii ashtakoodaha uusan ku qancin natiijooyinka baaritaanka ama xalka lagu taliyay, ashtakoodaha wuxuu codsan karaa in Kormeeraha guud ama qofka uu u magacaabay Kormeeraha guud in uu dib-u-eego arrinta. Codsiga noocaas ah ee dib-u-eegidda waa in uu si gaar ah u cadeeyo sababaha codsiga dib-u-eegista, waana in loo gudbiyaa Kormeeraha guud shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda kadib marka go'aanka baaraha la bixiyo. Kormeeraha guud ama qofka uu u magacaabay Kormeeraha guud wuxuu qaadi karaa baaritaanka dheeraadka ah ee noocaas ah ee asaga ama ayada ay u arkaan in uu ku habboon yahay. Kadib marka Kormeeraha guud ama qofka ayada ama asaga ay u magacaabeen uu dhammeeyo dib-u-eegista, asaga ama ayada waa in ay qoraal ahaan go'aan ku soosaaraan.

Go'aanka Kormeeraha guud ama qofka Kormeeraha guud uu u magacaabay waa in uu ahaado kan ugu dambeeyo.

La Ansaxiyay: 6 Maarso, 1997
La muraajaceeyay: 18 Febraayo, 1999
La muraajaceeyay: 16 Juun, 2000
La muraajaceeyay: 20 Juun, 2002

TIXRAACYADA SHARIGA AH. Title IX ee Hagaajinta Waxbarashada ee 1972, U.S.C. Qaybta 1681, et seq.
Title VI ee Qododka Sharciga ee Xuquuqda Shacabka ee 1964, 42 U.S.C. Qaybta 2000d, et seq.
Title II ee Qodobka Sharciga Dadka Reer Mareykanka ee Naafonimada Leh 1990, 42 U.S.C. Qaybta 12101, et seq.
Qaybta 504 ee Qodobka Sharciga Baxnaanista ee 1973